



## OGAYSIISKA XAQUUQAHA

# Xeerka Difaacyada Qandaraaslaha Madaxa Banaan (Independent Contractor Protections Ordinance)

## Qandaraasleyaasha Madaxa Banaan ayaa Xaq u leh:

- Inay helaan ogeysiiska qoran oo sheegaaya shuruudaha iyo xeerarka laga doonaayo shaqada iyo shuruudaha iyo xeerarka lacag bixinta kahor intaan shaqada la bilaabin.
- Inay helaan lacagta waqtiga loo cayimay sida ku cad shuruudaha iyo xeerarka ogeysiiska qoran ee shaqada kahor ama qandaraaska.
- Haddii aan la qeexin, markaan lacagta waa in lagu siiyaa 30 maalmood gudahood kadib dhamaystirka adeegyada ku cad qandaraaska.
- Inay helaan ogeysiis qoraal ah oo sheegaaya qaybaha gaarka ah ee xogta lacag bixinta markasta oo lacagta la baxsho.

## Qofkee ku jira Sharciga?

### Qandaraasleyaasha Madaxa Banaan ee Iskood u Shaqaynta ee:

- 1 aan lahayn shaqaalaha,
  - 2 sameeya ku sameeya wax kamid ah shaqadooda Seattle una qabta shirkad shaqaalaysiin oo ganacsi,
- IYO
- 3 heli doona ama filan kara si macquul ah inay helaan ugu yaraan \$600 wadarta guud oo lacagta mushaarka ah ayna bixinayso wakaalada shaqaalaysiinta inta U dhexaysa Janaayo 1 iyo Diseebar 31 sanadkaas.

## Ogoow XAQUUQDAADA Shaqaalaha:

- **AARGOOSIGU WAA MAMNUUC:** Sharciyadaan waxay ka difaacayaan shaqaalaha aargoosi ku aadan inay raadsadeen ama ku dhaqmeen xaquuqdooda sharci.
- **XAQA GUDBINTA CABASHADA:** Shaqaaluhu waxay xaq u leeyihiin inay cabasho u gudbiyaan Xafiiska Xeerarka Shaqaalaha (OLS, Office of Labor Standards) ama dacwad sharci ah gudbiyaan haddii cidda ay u shaqeenayaan jabiyo sharciyadaan.
- **XAQUUQAHA SHAQADA:** Haddii aad isleedahay waxaad tahay shaqaale, halkii aan ka ahaan lahayn qandaraasle madax banaan, la xariir Xafiiska Xeerarka Shaqaalaha (OLS).


Ka shaqaale ahaan, waxaad xaq u lahaan kartaa in lagu siiyo mushaarka qofka jiran, mushaarka ugu yar, mushaarka saacadaha dheeriga ah, iyo nasiinooyinka cuntada iyo nasashada ee mushaarka lagu bixiyo.

Samaynta xaquuqdaada sida ku cad xeerka ICP ayaan saamayn doonin wax xaquuqo ah oo shaqaale heli karo shaqaale ahaan.

## Wax kale

- Ogeysiiskan waa in lagu dhajiyaa meelo loo jeedo oo goobta shaqada kamid ah, asagoo ku qoran af Ingiriis iyo luuqadaha ay ku hadlaan shaqaaluhu.
- Haddii shaqaale ku shaqeeyo qaab oonleen ah ama uusan haysan goob shaqo ama xarun shaqo oo rasmi ah, shirkadaha loo shaqaynaayo ayaa siinaaya ogeysiis ku aadan xaaladaha gaarka ah oo ku qoran luuqada rasmiga ah ee shaqaalaha asagoo waraaq ah ama elektaroonig ah kaasoo la geli karo.
- Xafiiska Xeerarka Shaqaalaha (OLS) ayaa bixiya turjumaado, fasiraado, iyo caawimaado la siiyo dadka naafada ah.

**ISKAANKA MARI HALKAAN  
SI AAD U AKHRIDO  
XEERKA BUUXA IYO  
SI AAD U HESHO XOG  
DHEERAAD AH:**



## La xariir Office of Labor Standards

08/22

**QANDARAASLEYAASHA MADAX BANAAN:** U gudbi cabasho Xafiiska Xeerarka Shaqaalaha (OLS) ama dacwad u gudbi maxkamada.  
**WAKAALADAHA SHAQAALAYSIINTA:** Hel caawimaada ku dhaqanka sharciga iyo/ama gal tababar.

**206-256-5297**



**Seattle Office of  
Labor Standards**

[seattle.gov/laborstandards](https://seattle.gov/laborstandards)